

TURJUMADA RISAALADA
AL HAJRU SHARCIYA
IBNU TAYMIYA
الهجر الشرعي
ما يحل منه وما يحرم
لشيخ الإسلام ابن تيمية
Tarjumaha Risaalada
Abdi Rahmaan Al-athari

بِسْمِ اللهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيْم

# Ku bilaabid magaca alle ee naxariista Guud iyo midda Gaaraba  leh

# Tusmada Risaalada

1- Hordhaca Taxqiiqa ……………………………. 03

2- Hordhaca Tarjumaha …………………………05

3- Tarikhda ibnu Taymiyah………………………06

4- Su'aalo la soo waydiiyey………………………08

5- Bilowga jawabaha shekha……………………09

6- Qaybaha goonta (hajriga) ……………………09

7- Ka tagida munkaraatka…………………………09

8- Goynta qofka wado xumanta…………………12

9- Dawaabida goynta…………………………………15

# Hordhaca Taxqiiqa

Mahad Allaa leh, Nabadgelya-dii iyo naxariistii Alle ha ahaadeen Nabi Muxamed , Ehelkiisa, asxaabtiisii iyo intii samaanta ku raacday ilaa maalinta qiyaamaha intaa Kaddib.

Risaaladaan Waa Risaalo fudud oo ku Saabsan Mawduuca "Goynta Sharciga ah maxaa ka banaan maxaase ka xaraan ah" Risaalada waxa ay sharxaydaa u jeedooyinka Islaamka ee Hajriga Sharciga ah Noocyadiisa, Shuruudaha, Dawaabidiisa iyo Adilada Qur'aanka iyo Sunnada

Mu'alifka waa Sheekhul Islaam Ibnu Taymiyah, caalim daqiiq ku ah baxthiga caanna ka ah tacriifka.

Waxaan u cadeenaynaa kuwa isaga dhax qasmay arrintan ah Hajriga , Dadka qaar waxa ee u adeegsadeyn Hajriga iyo inkaarka si aan la amrin Markaas bay wax fasahaadiyen waxna ma hagaajin! kuwana waa ay ka leexdayn gabi ahaanba goynta iyo inkaarka markaa bay katagayn reebida munkarka la amray in ee reebaan midkii ku waajibay.

Baarista aan ku sameeyay Risaaladaan waxa aan u cuskaday nuqul qoraal ah oo aan ka helay mid ah fatwooyinka Sheekhul Islaam, nuqulkaas oo aan ka helay mid ka mid ah walaalaha, waxaa is tusay kala

duwanaanshaha nuqulka la daabacay Majmuucul fataawaana ku jira mujalladi siddeed iyo labaatanaan Waxaan u istaagay inaa ka soo saaro Aayadaha iyo axaadiista qoraalkiina si fiican ayaan u hagaajiyay.

Anaggana waxaa Alle wayne waydiisanaynaa inuu inaga yeelo kuwa xumaanta ka taga iyo waxa Alle ka reebay

**W/Q: Abuu Muxamed Ashraf bin Cabdullaah Maqsuud**

# Hordhaca Tarjumaha Risaalada

Waxaa  jeclaystay  inaa idinla wadaago Risaalo aad u yar oo ka hadlaydo (goynta shariciga ah maxaa ka banaan maxaase ka banaanayn) waa risaalo yar balse ka hadlaydo mowduuc aad u weyn, markii aan eegno waaqica jiro saameyn mugweyn ah ku leh sidda adigaba aad ogtahay akhriste bulshada waxaa isaga dhax milmay "Cidda ee ka hijroonayaan iyo qaabka ee hajrigaas u sameenayaan" in badan oo ka mid ah dadka waxa ee isku qaldaan goynta
loo sameenay ilaahay dartiis  iyo midda qofka u sameenayo dantiisa gaarka ah, risaaladaan waxa ee iftiiminay hajriga sharciga amray waxa uu yahay,  Risaalada waxa ee ku timid qaab su'aal waydiin ah , ibnu Taymiyah waxaa la soo weediiyey dhowr su'aalood  marka su'aalahaas waxaa ka dhashay  qorida risaaladaan hortaada taalo

**W/Q : Abdi Rahmaan Al-athari**

# Taariikhda ibnu taymiyyah oo kooban

Ibnu Taymiyyah magaciisa oo dhamaystiran waa Taqi Ad-din Abul Cabaas Axmed Ibnu Cabdil-Xaliim Ibnu Cabdi-Salaam Ibnu Cabdallah Ibnu Al-Khidr Ibnu Muxammad Ibnu Khidr Ibnu Ali Ibnu Abdallah Ibnu Taymiyyah Al-Harrani.

**Barbaarkiisii**

Wuxuu ku koray guri diinta laga barto, oo awoowgiis Abul Barakaat Cabdi Salaan wuxuu ahaa sheekhii qoray kitaabka:

(المنتقى من أخبار المصطفى صلى الله عليه و سلم)

wuxuu ka mid ahaa culumadii ugu waaweyneyd madhabta Xanbaliga, aabihiisna sidoo kale wuxuu ka mid ahaa culumadii isla madhabta, oo wuxuu ahaa bare iyo mufti, wuxuuna madax ka ahaa rugta xadiiska Sukariya دار الحديث السكرية tan iyo intii uu ka geeriyoodey.

**Culimadiisa**

Sheikhu culimo badan buu ka qaatay cilmiga waxana kamid aha aabihiis cabdi xalim ibnu cabdi salaan iyo sharafu diin al maqdasi al shaafici iyo taqiyudii al waasidi ibrahiim ibnu cali al saalixi al xanbali.

**Ardeydiisa**

Ardeydiisa wey badnaayeen waxaana ugu caansana : Xaafid shamsudiin ad dahabi, Xaafid ibnu kathir, Ibnu qayim al jowzi , Ibnu rajab al xanbali.

**Barashaddiisii xadiiska**

Kutubtii uu ka bartey xadiiska nabiga naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee waxaa ka mid ah:

مسند الإمام أحمد بن حنبل , الكتب الستة الكبار والأجزاء و معجم الطبراني الكبير

Wuxuu kale oo uu bartey fiqiga, usuulu-fiqiga, tafsiirka iyo naxwaha oo uu ka bartey ina CabdilQawi. Wuxuu bare ka noqdey rugta xadiiska Sukariya markuu jirey labaatan iyo kow sano, kadib markuu aabihii geeriyoodey.

Wuxuu casharada axaadiista & fiqiga ku bixin jiray masjid lagu magacaabo 'UMMAYAD' oo ku yaala magaalada 'Dimishiq' Syria oo loo yaqaano masjidka weyn ee Dimishiq.

**MADHABKISA**

Wuxu heestay madhabka xanabilada , wuxuna kamid aha culimada ugu waa weyn ee madhabka xanbaliga.

**DHIMASHADIISA**

Waxa uu ku dhintay –Alle ha u naxariistee- Al-Qalcah maalin Isniin ah 9- Jumada Al-Thaani sannadkii 728 ee Hijriyada.

## *Su'aalo la soo waydiiyey*

**بِسْمِ اللهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيْم**

سئل الشيخ الإمام العالم العلامة والبحر الفهَّامة أبو العَبّاس تقي الدين أحمد بن تيمية الحراني - رضي الله عنه وأرضاه -:

Waxaa la weediiyey Sheekhul islaam ibnu Taymiyyah Raximahullah Su'aalahaan hoos ku qoran:

**1**-Yee ku banaantahay in loo caroodo, La Naco (بُغضة) ama lagooyo laga hijroodo( هَجْرُه ) Ama labaduba leysugu daro Siddaasna loo sameenayo ilaahey Dartii لله عز وجل.

**2**. Maxaa loo shardiyaa Qofka u sameenayo Carada (Nacida) iyo Hajriga ( goynta) ilaahey dartii?

**3**. Salaanta oo la qaadin ma soo galaydaa Hijraanka mase maya ?

**4**. Haddii kan laga haajiray uu bilaabo inuu salaamo Qofkii ka haajiray, ma waajib baa in uu ka radiyo Salaanta mase maahan?

**5**.Ma saconydaa Caradda iyo hijrada (لله عز وجل) Inta laga xaqiijiyo Suulida Sifaddii keentay Carada iyo Hijrada ? Siddoo kale maleedahay muddo layaqaano? Haddii ee leedahay muddu layaqaano waa maxay muddadaas Xadkeyda? Noo fatwaado Ajar alle ha idin siiyee ?!

## Jawaabta Sheekhul islaam su'aalihii la soo weediiyey

□أنواع الهجر الشرعي :
الهجر الشَّرعي نوعان : أحدُهما : بمعنى التَّرك للمنكرات . والثّاني : بمعني العقوبة عليها .

**Qeybaha Goynta sharciga** ah Waa labba waxayna ka la yihiin.

**1-** In laga tako oo laga fogaado Dadka munkaraadka waddo marka ee ku jiraan **2**- In Cuquubo laga dhaliyo Qofka munkarka uu ku jira ama uu waddo.

*( In qofka lagu ciqaabo, la gooyo, laga haajiro ama laga tago xumaanta lagu arkay darteed sidda munkaraadka, bidcooyinka uu layimid siddoo kale Cuquubada waa nuucyo badantahay).* "Markii laga hadlaayo labbada Qeybood ee goynta ama hajriga midda 1-aad waa ee fududahay sameynteeda lkn waxa ee risaalada ku fogaan doontaa sharxida qodobka ama nuuca 2-aad ee hajriga"

**1- In laga tago Dadka munkaraadka ku jiro**

Dadka munkarka waddo in laga haajiro waxaa lagu xusay ilaahey haddalkiisa

**قال تعالي ( وَإِذَا رَأَيْتَ الَّذِينَ يَخُوضُونَ فِي آيَاتِنَا فَأَعْرِضْ عَنْهُمْ حَتَّىٰ يَخُوضُوا فِي حَدِيثٍ غَيْرِهِ ۚ وَإِمَّا يُنسِيَنَّكَ الشَّيْطَانُ فلا تَقْعُدْ بَعْدَ الذِّكْرَىٰ مَعَ الْقَوْمِ الظَّالِمِينَ )**

**( Markii aad aragto dadka dhax dawaalanayo Aayaadkena ka jeedso ilaa ee ka Aadaan haddal kale "Aan aayaatka aheyn" , haddii uu ku hilmaamsiiyo sheydaanka markaad soo xasuusato hala sii joogin Qoomka Daalimiinta ah).**

**فال تعالي (.. أَنْ إِذَا سَمِعْتُمْ ءَايَٰتِ ٱللَّهِ يُكْفَرُ بِهَا وَيُسْتَهْزَأُ بِهَا فلا تَقْعُدُواْ مَعَهُمْ حَتَّىٰ يَخُوضُواْ فِى حَدِيثٍ غَيْرِهِۦٓ ۚ إِنَّكُمْ إِذًا مِّثْلُهُمْ..)**

**( Markii aad maqashaan aayaatka ilaahey oo lagu kufrinaayo laguna jees-jeesayo hala fariisanina ilaa ee dhex dawaashaan hadal kale, adinku waxaa lamid tihiin ayaga oo kale haddaana ka tagin.. )**

Waxaa loola jeedaa qofka in uu san xaadirin munkaraadka asaga oo waxaba dan ah ka laheyn, tusaalo ahaan Qolyo khamra cabeeso oo kale in aanan agtooda la fariisan ama Qolyo kuugu yeertay Waliimo ama aroos waliimadaas oo dhaxdeeda ahaday Khamro iyo heeso ..i.w.m

Qof waxaa jiro loo baneeyay in uu soo xaadiro waana qofka rabo in uu munkarka ama xumaanta suuliyo iyo qofka asaga oo dooranin yacni u qasdin meesha imaada.. *( aan dooranin waxa uu sheekha kala jeedaa tusaalo ahaan in meel dan kaaga xirantahay meeshaasna hees ka daarantahay ma awoodid inaa suuliso markaa oo kale adiga ma dooranin inaa heestaan dhagahaada maqlaan balse dan baa meesha ku keentay)*

Ma banaano inaa xaadirto meel munkar lagu haayo siddaa darteed waxaa layiraahdaa " حَاضِرُ المُنْكَر كَفَاعِعله " Qofka munkarka Xaadiray Qofka sameenayo ayuu lamid yahay.

**وفي الحديث: (من كان يؤمن بالله واليوم الآخر فلا يجلسُ على مائدةٍ يُشْرَبُ عَلَيْهَا الخَمْرُ) .. حديث حسن: من حديث الجابر رضي الله عنه**

**( Qofkii Rumaysan Allaah iyo maalinta aakhiro yuuna fariisan Miis lagu cabayo Khamro )**

Hajarkaan waxa uu ka mid yahay qofka oo nafsadiisa ka fogeeyo sameenta munkaraadka.

**كما قال ﷺ : " المُهَاجِرُ مَنْ هَجَرَ مَا نَهَى الله عَنْهُ " أخرجه البخاري**

**" Muhaajirka waa qofka ka hajrooday waxa Alle ka reebay"**

Waxyaababaha soo raaco baabkaan waxaa ka mid ah: in laga soo hijroodo Daarta kufriga iyo fusuqa loona soo hijroodo daarta islaamka iyo iimaanka.In laga hijroodo ku nagaashaha kufaar dhaxdooda iyo munaafiqiin Kuwaa aan kuu ogolaaneyn in aad la timaado wixii Alle ku amray.

**2- In Cuquubo laga dhaliyo Qofka munkarka uu ku jira ama uu waddo.**

Goyntaan Waa qeybta labbaad waxa uuna ka hadlayaa in la edbiyo dadka munkaraadka sameenaya. ( الـهَجْرٌ عَلـى وَجْه التَأدِيْب).

Waxa uu yiri mu'alifka: Hajriga Edbinta ku saabsan Waa in laga haajiro ama lagooyo qofka munkaraadka muujisanaayo , in laga haajiro inta uu towbad kala imaanayo, siddii nabiga SCW iyo muslimiinta uga haajireyn saddaxdii saxaabi ee ka haray jihaadka ilaa uu ilaahey soo dajiyey towbadooda, markii ee ka tageyn jihaad ku waajibay cudur daar la'aan, Rasuulka ilaahey kama haajirin kuwa muujisanayo kheyrka haba ahaadaan munaafiqiin, goynta nuucaana Waxa ay istaageydaa manziladii Tacsiirta "منزلة التعزي"

*(Hajriga laguma fuliyo Qof wanaag muujistay xumaan hadday rabto ha u qarsanaato Balse waxaa lagu fuliyaa Qof Xumaan muujistay Rasuulka alle Waxa uu ka tagay Munaafiqiin Cudur daar layimid Cudurdaarkooda waa aqbalay laakiin Saxaabadii Qaladka ku dhacay Waxaa lagu xukumay in laga haajiro ama la gooyo).*

Tacsiirta waxaa lagu qaadayaa qofkii ee ka muuqato in uu ka taggay waajibaadka , siddoo kalana sameenaya muxaramaadka, sidda Salaada qofkii ka tagay ,zakada ka tagay , Qofka la jahro dulmiga , Fawaaxishta Iyo bidcada khilaafsan kitaabka Qur'aanka, sunnada Nabiga SCW iyo

ijmaaca salafka umada oo ee muuqato in ee bidac tahay waxa uu dadka ugu yeeraayo.

**وهذا حقيقة قول من قال من السلف والأئمة : " أن الدُّعاة إلى البِدع لا تُقْبَلُ شَهَادتهم ، ولايصَلَّى خَلْفُهم ، ولا يُؤْخَذُ عَنْهُم العِلم ، ولا يُنَاكحون ". فهذه عقوبة لهم حتى يَنْتَهُوا ؛**

**( Dadka bidcada ugu yeero dadka markhaatigooda lama aqbalaayo, lagu daba tukan maayo , laga qaadan maayo cilmiga , waxna loo guurin maayo)** arinkaana waa cuquubo ku wajahan inta ee ka laabanayaan arinka ee ku jiraan Oo ah dadka in ee bidco ugu yeeraan ;

Halkaan markii lajoogo waa lakala qaadaa Qofka bidcada ku jiro balse dadka aan ugu yeerayn iyo kan bidcada ku jiro dadkana ugu yeeraayo, sabatoo ah midka bidcada dadka ugu yeeraayo waxa uu muujiyey munkar Waxa uuna mudanyahay in la ciqaabo, lkn midka qarsanaayo bidcada dadkana aan ugu yeerayn ma mudna in la ciqaabo sababtoo ah kama shar-badna munaafiqiintii joogtay xiligii Nabiga Kuwaas uu Nabiga ka aqbalay wanaaga ee muujisanaayen , Asaga oo ogaa in badanoo munaafaqiin ah xaalkooda.

Arinkaan waxaa ku yimid Xadiithkaan

**في الحديث : " إِنَ الْمَعصِيَةَ إِذَا خَفِيَتْ لَمْ تَضُرَّ إلا صَاحِبَهَا، وَلكنْ إذا أُعْلِنَتْ فَلَم تُنْكَرْ ضَرَّتِ العَامَّةَ "**

**" Macsiyada haddee qarsoontahay dhibaato u geesan maydo ilaa qofka sameeya , laakiin haddii la muujiyo markaasna la inkirin waxay dhibaato u geesaneydaa umadda oo dhan "**

Waxaa kale uu nabiga SCW yiri;

**( إِنَّ النَّاسَ إِذَا رَأَوْا مُنْكَرًا لَمْ يُغَيِّرُوهْ، يُوشِكُ أَنْ يَعُمَّهُمُ اللَّهُ بِعِقَابٍ) حديث صحيح أخرجه الترمدي.**

**" Dadka haddey arkaan Xumaan oo eena baddalin waxay qarka u saaranyihiim in Rabbi Ku Camimo (Baabi'iyo) Cadaab dhamaantood "**

Munkaraadka muuqda waxaa waajib ah in la suuliyo haddii la awoodo laakiin munkaraadka ama Xumaanta qofka u qarsoon asage gaar u tahay haddii cuquubadayda leedahay. ( Waa ee ka duwantahay sidda kuwa muuqdo loola dhaqmaayo kuwa qarsoon, yacni farqi baa u dhaxeeyo kuwa muuqdo iyo kuwa qarsoon , kuwa muuqdo waxa ee saameyn ku yeelan karaan bulshada muslimiinta waana sababta qofka waddo loola coleetamaayo lkn kuwa qarsoon bulshada saameeyn kuma lahan qofka qarsanaayo asagee ciqaab ku tahay.)

## Shuruudaha iyo Dawaabida goynta sharciga ah

Hajrigaan (*waa Hajriga Edbinta kuwa xumaanta iyo bidcada ku jira*) waxa uu u kala duwan yahay hadba sida ay u kala duwan yihiin dadka laga hijroonayo, markii la fiiriyo dhanka tabartooda, tabar daridooda, yaraantooda iyo badnaantooda *( Haddii dadka sameenaya goynta badanyihiin markaa waa u banaantahay in ee ka Hijroodaan sabatana waa ka badanyihiin sidda Nabiga scw iyo saxaabada uga Hijroodeen saddaxdii Saxaabi ee ka dib dhacay dagaalkii Tabuuk).*

Yoolka ama maqsadka laga leeyahay Hajriga waa Qofka laga goonayo oo la adbayo/edbinayo si uu arinkaas uga laabto dadweynahana xaaladiisa oo kale in ee san ku dhicin la tusiyo. (*in la edbiyo kuwa layimid xumaanta ,munkaraadka iyo bidcooyinka si dadka kale ay san ugu kadsoomin waxa ee layimaaden oo bidac iyo xumaan ah).*

Haddii danta laga leeyahay arinkaas la sameenayo (goynta /Hajriga) maslaxadiisa tahay mid raajix ah oo u horseedayso sharta in ee daciifto ama yaraato waa mashruuc Hajrigaas/goyntaas *(Hajriga lagu sameenaya kuwa ku jiro xumaanta , bidacda, macsiyada iyo fisqiga haddii ee Shartooda ku daciifaydo ama ku yaraanaydo Waa sharci hajrigaas).*

Balse haddii wax maslaxo ah ugu jirin hajriga kan goynta sameenaya iyo kan lagoonaya, shartana ku badanaydo, mafsadadiisa ee ka raajaxsantahay maslaxadiisa haduu xaalka siddaa noqdo goyntaas mashruuc ma ahan, bal waxaa dhici karta soo dumitaanka ama soo dhoweenta dadka qaarkii in uu uga wanaagsanyahay hajriga ama goynta la goonayo.

Hajrigaana dadka qaarkii uga fa'ido badanyahay soo dhoweenta ama soo dumitaanka ; siddaa darteed Nabiga SCW labbadaba waa sameeyey dadna waa soo dhoweestay, dadkalana waa foogeeyay oo uu ka haajiray, sidda Nabiga scw ku sameeyey saddaxdii saxaabi ee laga daba mariyey dagaalkii Tabuuk ( كما أن االثلاثة الَّدين خلِّفوا كانوا خيرًا من أكثر المؤلفة قلوبهم) saddaxdaa saxaabi waxa ee ka kheyr badnaayeyn dad badan oo uu Nabiga scw soo dhowayn jiray Qulubtoodana soo dumaayey, kuwaa waxay ahaayayn Niman laga danbeeyo oo madax ah dadkoodana adeeco maslaxada waxa ee tahay in la soo dummo quluubtooda , saddaxda saxaabi oo la gooyana waxay ahaayeyn mu'miniin, mu'miinta ayagoo kalana waa badnaayayn in ayaga lagooyo waxaa ku jirtay diinka sharaftiisa, ayagana dunuubta laga dahiriyo *(Nabiga scw waxa uu siddaa u yeelayo waxa ee tahay dadkaa uu soo dhoweesanaayo waxa ee ahaayeyn Dad hogaan u ah qoomkooda haddii ee ayaga diinka qaataan dad badan baa sabab u noqan karaan in ee soo raacaan arinkaana*

*diinta maslaxo ayee u tahay Nabiga scw kuwaan maslaxadaan buu u soo dhowaystay , Marka la eego saddaxda saxaabi arinkooda Ayaga waa dad mu'miniin ah labba arina maslaxo waa ee u tahay goyntooda* ***1-*** *In mu'miniinta kale aysan ku dhicin khaladka ee ku dhacayn saxaabadaan kuna waantoobaan waxa lagu sameeyey ee goynta ah* ***2-*** *in saddaxda saxaabi lagu ciqaabo arinka goynta ah si aysan mardanbe ugu laaban waxa ee ku dhacayn siddoo kalana dunuubtii ee galayn in laga tirro).*

Siddaa darteed hajriga waxa uu ukala duwanyahay sidda uu ukala duwanyahay markii gaalada lala dagaalaayo, mar haddii Muslimiinta awood leeyihiin waa in ee gaalada iska celiyaan oo ku jihaadaan, haddii aysan la dagaalami karin waa in ee lagalaan Hudno "is-nabad gelin" , haddii ee ka awood sareeyaan muslimiinta gaalada waa inay ka qadaan gaalada ku dhax nool Jisya " الجزية" , arrinkaan hadba waxaa loo fiirinaa axwaasha iyo masaaliixda.

Jawaabaha ka imaan jiray imaamu Axmed waxa uu ku salaysnaa asalkaas, siddaa darteed imaamul Axmed waa kala qaadi jiray meelaha ee u badanyihiin bidacda, sidda bidacda Qadarka dafiridiisa ugu badnayd Basra "البصرة", Al-tajahum *(Tajahumka waaa kuwa inkiray Sifaadka alle)* Waxa uu ku badnaa khuraasaan" بخراسان", Shiicada iyo tashayuca waxa uu ku badnaa kuufa "بالكوف", *( ujeedka waxa uu yahay ahlu-sunnaha joogo Basra waxaa ka*

*badnaa kuwa Qadarka inkirsanaa, marka masamayn karin goyn ama hajar sababtoo ah meesha waa loogu badanaa, siddoo kale Khuraasaa Ahlu-sunnaha joogay waxaa ka badnaa Tajahumka..iwm sabatoo ah hajarka ee sameenaya waxaa dhici karto in ee dhibaato kala kulmaan , Shartana ku sii badato..)*

Waxaa kale oo uu imaamku kala duwaayey Dadka hajrada sameenaya oo A'imada la adeeco ah iyo kuwa kale (*Kuwa a'imada ah oo warkooda la maqlayo yacni la adeecayo hadduu ku dhawaaqo in Hajar la sameenayo warkiisa la adecayo iyo kuwa aan a'imada ahayn oo warkooda la maqlayn hadduu goyn ku dhawaaqo iyo haddii kale)*

**" وإذَا عُرِفَ مقصود الشريعة، سُلِك في حصول أَوْصَل الطُرق إليه ."**

**" Haddii la garto shareecada maqsuudkayda waxaa la qaadayaa wadada lagu gaari karo maqsuudka xaqiijintiisa ".**

Haddii la garto hijrada sharciga ah waxa ee ka mid tahay acmaasha ilaahay na amray iyo Rasuulkiisa, haddaba ilaahay in la adeeco iyo rasuulkiisa waa in ee noqoto mid Rabi khaalis u ah, waafaqsan amarka ilaahay siddoo kale noqotaa mid khaalis u ah ilaahey Saxiixna ah.

Qofkii hawadiisa ka hijrooda ama sameeyo hajri aan la amrin arinkaas hajriga kuma jiro, waxaa jiro dad badan oo

u hijroonaya hawadooda ayagoo u maleenayo in ee u hijroonayaan ilaahay daraadii.

Hajriga insaanka dantiisa ku saabsan ma banaano in uu ka bato saddax maalin sidda saxiixaynka ku timid waxa uu yiri rasuulkii alle.

**وعنْ أَبِي أَيُّوبَ : أَنَّ رَسُولَ اللَّهِ ﷺ قَالَ: "لا يَحِلُّ لِمُسْلِمٍ أَنْ يَهْجُرَ أَخَاهُ فَوْقَ ثلاثِ لَيَالٍ، يَلْتَقِيَانِ, فَيُعْرِضُ هَذَا، ويُعْرِضُ هَذَا، وخَيْرُهُمَا الَّذِي يَبْدَأُ بِالسلامِ." مُتَّفَقٌ عَلَيْهِ.**

**" Ma banaano qofka muslimka ah in uu walaalkii ka hijroodo wax ka badan saddax maalin, waa kulmaayaan markaas buu midba dhinac u jeedsan , waxaana u khayr badan labbadooda midkii salaanta bilaabo"**

Hajrigaan qofka looma fasaxin wax ka badam saddax maalin , sidda aan loogu ogolaan sowjada "إحداد" inay sameedo wax ka badan saddax maalin ( *إحداد waxaa la dhaahaa in hawenayda ee isqurxinta ka tagto haddii uu dhinto qof ehelkeda ah sidda Walaal Aabe..i.w.m lkn marka sowjkeeda dhinto sidda mashruuca ahayd waa 4bil iyo 10 maalin ee ka tageydaa is qurxinta, is carfinta.iwm ).*

Waxaa ku yimid saxiixaynka;

**عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رَضِيَ اللهُ عَنْهُ أَنَّ رَسُولَ اللهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ (تُفْتَحُ أَبْوَابُ الْجَنَّةِ يَوْمَ الإثنين، وَيَوْمَ الْخَمِيسِ، فَيُغْفَرُ لِكُلِّ عَبْدٍ لَا يُشْرِكُ باللهِ شَيْئًا، إلا رَجلا كَانَتْ بَيْنَهُ وَبَيْنَ أَخِيهِ شَحْنَاءُ، فَيُقَالُ أَنْظِرُوا هَذَيْنِ حَتَّى يَصْطَلِحَا) متفق عليه**

**" Waxaa la furaa janada al-baabahayda maalin kasta isniinta iyo khamiista , ilaahay waxa uu u danbi dhaafaa addoon kastaa oo aan ilaahay wax la wadaajin " Shirki sameenin " , ilaa qof mooyee asaga iyo walaalkii u dhaxeeyo cadaawad, Kuwaas waxaa laleeyahay: ukaadiya kuwaan ilaa ee ka soo heshiiyaan"**

Hajrigaan qofka xaqiisa ku saabsan waa xaaraan, laakiin waxaa la fasaxay qaarkii , sidda looga fasaxay sowjka in uu kaga fogaado (ka haajiro) jiifka xaaskiisa markii ee daacadiisa ka baxdo, sidda loogu fasaxay (ruqseeyay) qofka in uu saddax bari ka hijroodo walaakii haddee is-dagaalaan.

Marka waxaa habboon in uu qofka kala qaado hajriga qofka u sameenayo ilaahay dartii " الـهَجْر لِحَق لله " iyo Hajriga uu usameenayo Dantiisa "الـهَجْر لِحَق نَفْسِه ".

**Midda hore** Waa lays amray oo rabbi adoomadiisa asagaa amray **Midda labaad** waa layska reebay ilaahay

Addoomadiisa waa ka reebay, sabatoo ah muminiinta waa walaalo.

**قالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: (لا تَقَاطَعُوا، وَلا تَدَابَرُوا، ولا تَبَاغَضُوا، وَلا تَحَاسَدُوا، وَكُونُوا عِبَادَ اللَّهِ إِخْوَانًا، ولا يَحِلُّ لِمُسْلِمٍ أَنْ يَهْجُرَ أَخَاهُ فَوْق ثلاثٍ ) متفق عليه.**

**( Ha isgoonina , ha isku dhabar jeedinina, ha isu caroonina , ha is xasdinina , noqda adooma Alle oo walaalo ah , muslimka muslimka kale waa walaalkii "**

**قال رسول الله صلى الله عليه وسلم :" ألا أنَبِئُكُم بأفضلِ مِنْ درجةِ الصلاة والصيام ، والصدقة والأمرِ بالمعروف والنهي عن المنكر ؟ قالوا : بلى يارسول الله! ، قال : إصلاح ذاتِ البَينِ ، فإنَّ فساد ذات البينِ هي الحالقَةُ ، لا أقول تحلق الشَّعر ولكن تحلق الدِّبن" حديث صحيح ؛ رواه ابو داود ، والترمدي، والبخاري، وابن حبان.. من حديث أبي الدرداء**

**( Miyaanan idinkaga waramaynin camal ka fadli badan salaada darajadeeda, Soonka darajadiisa , sadaqada darajadeeda, iyo wanaagoo lays amro iyo munkarka oo layska reebo ? Saxaabada waxa ee dhahayn Haa rasuulkii Allow!! Waxa uu Nabiga: Dadka arrin fasahaad dhax-yaalo hagaajintooda, Dadka arinka u dhaxeeyo fasahaadka ah waa arin wax xiira, ma'idin dhahaayo Timo buu arinkaas xiiraa laakiin diinka buu xiiraa)**

**وقال الحديث الصحيح : ( عن النعمان بن بشير -رضي الله عنه- مرفوعاً: «مَثَلُ المُؤْمِنِينَ في تَوَادِّهِمْ وتَرَاحُمِهِمْ وتَعَاطُفِهِمْ، مَثَلُ الجَسَدِ إذا اشْتَكَى مِنْهُ عُضْوٌ تَدَاعَى له سَائِرُ الجَسَدِ بالسَّهَرِ والحُمَّى».**

**Mu'miniinta tusaahooda markii loo fiiriyo isjeclaantooda, isu naxariisashada iyo isku dhimrinta waxa ee lamid yihiin hal jir oo kali ah , jirkaas hadde xubin ka xanuusato jirka intiisa kale baa la xanuusanaa waxa uu kula xanuusanaa xumo/qandho iyo soo jeed**

Hajriga waxa uu ka mid yahay cuquubaadka sharciga ah waana jinsi ka mi ah jihaadka jidka alle loogu diriraayo, jihaadka waxaa loo sameeya si kalmada Alle noqoto midda saraydo , diinka dhamaantiina uu Alle u sugnaado, qofka mu'minka ah waa in uu alle daraadiis ula Colaytamo (gaalada), Alle daraadiis u xariiriyo (mu'minka). Qofka hadduu mu'min yahay waa in uu xariiriyo haddu rabbo ha dulmiyo, sababtoo ah dulmiga ma jaraayo xiriirka u dhaxeeyo labbada qafood xiraarkaas oo ah iimaanka

**قال تعالى: (و إِن طَآئِفَتَانِ مِنَ ٱلْمُؤْمِنِينَ ٱقْتَتَلُواْ فَأَصْلِحُواْ بَيْنَهُمَاۖ فَإِنۢ بَغَتْ إِحْدَىٰهُمَا عَلَى الأخْرَىٰ فَقَٰتِلُواْ ٱلَّتِى تَبْغِى حَتَّىٰ تَفِىٓءَ إِلَىٰٓ أَمْرِ ٱللَّهِۚ فَإِن فَآءَتْ فَأَصْلِحُواْ بَيْنَهُمَا بِٱلْعَدْلِ وَأَقْسِطُوٓاْۖ إِنَّ ٱللَّهَ يُحِبُّ ٱلْمُقْسِطِينَ¤ إِنَّمَا المُؤ مِنُونَ إِخْوَةٌ )**

**( Haddii labba kooxood oo mu'miniina ee dagaalamaan heshiis dhax dhiga dhaxdooda hadee midood xad-gudubto midda kale ku xad-gudubto ladagaalaba mida xad-gudbeeso ilaa ee uga soo laabato ilaahay amarkiisa hadde u soo laabato amarka ilaahay waxaa dhax dhigtaan cadaalad, cadaalad sameeya ilaahayna waxa uu jecelyahay dadka cadaalada sameeyo. Mu'miniinta waa walaalo).**
ilaahay waxa uu ku tilmaamay walaalo ayaga oo isdagaalay oo isku xad-gudbay waxa uu Alle amray in dhaxdooda heshiis la dhigo.

Ha u fiirsado qofka mu'minka ah farqiga u dhaxeeyo labbadaan nuuc ee hajriga ah, *( labbada nuuc ee uu sheekhul islaam tilmaamayo waa labbadii aan soo marnay 1- in qofka marka uu xumaanta ku jiro laga haajiro middaan ah in qofka munkaraadka meelaha ka socda ka fogaado waa in uu isaga tagaa hadduusan suulin karin 2- In la edbiyo oo laga haajiro dadka xumaanta sameeyo Middaan waxaa loo eegayaa waxa ka dhalan karo hajrigaaga iyo goyntaada),* waxaana badan inay isku darmaan labbadaba oo midkood midka kale ku darmo , Qofka mu'minka ah waa in oo ogaadaa inay waajib tahay in uu xariiriyo mu'minka kale habba dulmiyo hana ku xadgudbo hadduu rabbo, waxaa ku waajib ah gaalkana in uu la colaytamo wax ha siiyo ama wanaag ha u sameeyo hadduu rabbo.

ilaahay waxa uu Rasusha u soo diray ,kutubtana u soo dajiyey diinka in uu dhamaantii asaga lahaado, jacelaantana asaga lahaado, jeclaantana Owliyadiisa usugnaato, Caradana Cadowgiisa u sugnaato , karaamadana Owliyadiisa u sugnaato, dulaynta /ihaanada cadowgiisa u sugnaato , abaalmarinta aakhiro Owliyadiisa usugnaato, ciqaabtana Cadwogiisa u sugnaato.

Haddaba waxaa dhici karta hal qof inay ku kulmaan shar iyo kheyr , Xumaan iyo wanaag, macsiyo , sunno iyo bidco: qofkaas waxa uu mudanyahay in lagu karaameeyo wanaagga uu layimid laguna abaal mariyo, waxaa kale uu mudanyahay in lagula colaytamo oo lagu ciqaabo sharta uu layimid, Qof kali ah waa ku wadda kulmi kartaa wax waajib ah in lagu karaameeyo iyo wax uu mudanyahay in lagu ciqaabo, Kana waa ku kulmi kartaa  Yacni Khayr ,kaasna waa ku kulmi kartaa yacni Shar, **tusaale:** hadduu tuug faqiir ah oo wax xaddo gacantaa laga jaraa markii gacanta laga jarro waxaa waajib ah in baytul-maalka wax laga siiyo waxaas oo kaga filan baahidiisa *( markii la eego ninkaas tuuga ah marna waala ciqaabay oo gacantaa laga jaray marna maadaama oo uu mu'min yahay baytul-maalka muslimiinta baa wax laga siiyey).*

Kani waa asal ee isku waa faqayn Ahlu-sunnaha wal-jameeca, waxaana ku khilaafay ahlu-sunnaha khawaarijta Muctazilada iyo kuwii ayaga waafaqay kuwaa khwaarijta iyo muctazilada dadkii waxa ee ka dhigayn kuwa muta Abaal-marin iyo kheyr kaliya. Iyo kuwa muta ciqaab kaliya

*( Dadka makala qaadaan labbadaan koox ama waa ahlu-kheyr mudan in la'abaal mariyo ama waa ahlu-shar mudan in la ciqaabo).*

**وأهْلُ السُنـة يقولون: إن الله يُعَذِب بالنـار من أهل الكَبَائر من يُعَذِبه ، ثمَّ يُخرجهم منـها بِشَفَاعَة من يأذن لـه في الشَّفاعة وبِفَضْلِ رَحْمَتِه ، كما استفاضت بدلك السُّنـة عن النَّبي صلى الله عليه وسلم .**

**( ilaahay naarta ayuu ku cadaabayaa dadka ahlul-kabaairta ,kadibna naarta ayuu ka soo bixin doonaa shafaacada qofka uu u idmo qofkaas in uu u shafeeco ama fadligiisa iyo Raxmadiisa ayuu naarta uga soo bixinayaa, sidda ee arinkaas ugu badantay sunnaddii nabiga laga wariyey scw)**

والله سُحانه وتعالى أعلم [ وصل الله على مُحمد وعلى آله وصحبه أجمعين ]